




Barnaamij cusub oo u oggolaanaya shaqaalaha Oregon inay u qaataan fasax mushahar leh qaar ka mid ah wakhtiyada aadka muhiim ugu ah nolosha ee saameynaya qoysaskeena, caafimaadkeena iyo badbaadadeena.

Waa maxay qorshaha u dhigma/la midka ah?

Loo shaqeeyayaasha waxay siin karaan qorshayaal ah fasaxa mushaharka leh ee u dhigma/la midka ah shaqaalahooda iyadoo ah beddelka kaqeyqaadashada barnaamijka Fasaxa Mushaharka leh ee Oregon.

Waa maxay shuruudaha guud ee qorshaha u dhigma/la midka ah?

Qorshe u dhigma/la midka ah waa inuu:

-  Daboolaa dhammaan shaqaalaha si isdaba joog ah uu uga shaqeysiiyay loo shaqeeye ugu yaraan 30 maalmood ee maalmaha kalindarka (jadwalka-taariikhda).
-  Hubiyaa in wax ku darsashada shaqaalaha aysan ka weynayn waxa lagu soo dalaci lahaa qorshaha gobolka.
-  Bixiyaa faa'iidooyin la mid ah ama ka sareeya faa'iidooyinka ay bixiso qorshaha gobolka, oo ay ka mid yihiin:
 1. U oggolaanshaha fasaxa ah sababaha qoyska, caafimaadka, iyo badbaadada
 2. Bixinta illaa iyo 12 toddobaad/usbuuc oo fasax mushahar leh ah sanadkiiba (oo u dheeraad ah labo toddobaad/usbuuc ee ah fasax caafimaad ee la xiriira uurka)
 3. U Oggolaanshaha shaqaalaha inay qaataan fasax mushahar leh hal maalin wakhti walba ama maalmo isdaba joog ah
 4. Inaysan jirin xaalado dheeraad ah ama xayiraadyo ah inay shaqaalaha isticmaalaan fasaxa mushaharka leh



Goormaan soo gudbin karaa codsi qorshe u dhigma/la midka ah?

Loo shaqeeyayaasha waxay soo gudbin karaan codsiyada laga bilaabo Setembar 2022. Waxaan rajeyneynaa in howsha dib-u-eegista ay qaadan doonto ugu yaraan 30 maalmood.

Imisa ayey noqon doontaa qiimaha codsiga ugu horeeyo?

Lacag-bixinta codsiga ee qorshayaasha u dhigma/la midka ah ee cusub waa \$250.

Waa maxay noocyada qorshayaasha u dhigma/ la midka ah ee loo shaqeeyuhu uu bixin karo?

-  Qorshaha u dhigma/la midka ah ee uu maamulo-loo shaqeeyaha – loo shaqeeyaha ayaa qaadaya mas'uuliyada dhammaan halista maaliyadeed ee la xiriira faa'iidooyinka iyo maamulida qorshaha u dhigma/la midka ah, haddii ay noqoto in qorshaha uu maamulo loo-shaqeeyaha ama uu maamulo dhinac- saddexaad.
-  Qorshe u dhigma/la midka ah ee si buuxda u daboolan – loo shaqeeyuhu wuxuu ka iibsadaa siyaasad caymis shirkad caymiska, iyo faa'iidooyinka la xiriira qorshaha waxaa maamula siyaasada.

Miyuu loo-shaqeeyuhu siin karaa qorshe u dhigma/la midka ah qaar, laakiinse aan ahayn dhammaan, shaqaalaha? Maya, loo shaqeeyuhu waa inuu siiyaa daboolid hoos timaada qorshaha u dhigma/la midka ah dhammaan shaqaalaha hoos yimaada lambarka aqoonsiga ganacsiga ee loo shaqeeyaha (Business Identification Number, BIN).

Miyay qasab ku tahay in loo-shaqeeyayaashu ay cusbooneysiyaan ansixinta qorshahooda u dhigma/la midka ah? Haa. Loo shaqeeyayaashu waa inay dib u codsadaan ansixinta sannad walba, keliya sedexda sano ee ugu horreysa. Saddex sano ka dib, loo shaqeeyayaashu dib uguma baahnaan doonaan inay dib u codsadaan ansixin oo qorshayaashooda u dhigma/la midka ah wuu sii jiri doona ilaa dib loo ceshado ama la joojiyo.

Baro wax Dheeraad ah.



Booqo paidleave.oregon.gov iyo isku qor [imaylka waribixinada](https://www.oregon.gov/employment/paidleave/waribixinada). Imayl



noogu soo dir paidleave@oregon.gov.



Naga soo wac lambarka 833-854-0166.